

July 18, 2019

**Mudane: Xamza Cabdi Barre**

Gudoomiyha , Guddiga Madaxa bannaan ee Xudduudaha iyo Doorashooyinka Jubaland.

Mudane Hamza,

**Ujeedo: Codsi Faah - Faahin shuruudaha murashaxa madaxatinimada Jubaland.**

Waxaan helay warqadii qoraalka ahayd ee xafiiskiinu soo saaray July 18, 2019, oo aad ku qeexdeen shuruudaha murashaxa madaxwaynaha Jubaland. Guddiga madax bannan ee xudduudaha iyo doorashooyinka Jubaland ayaa mas'uul ka ah dadka Jubaland ayna saaran tahay in la hubiyo in cod-bixiyayaasha (75-xubnood ee baarlamaanka) aan la marin habaabin si ula-kac ah, fariimo khaldana aan loo gudbin.

Anigoo ah murashax madaxweyne, waxaan dib u eegay qoraalkiini la xiriiray shruudaha looga baahan yahay murashaxa madaxwayne ee Jubaland, waxaana si xurmad ku jirto ku cadsanaayaa in si deg-deg ah aad iila wadaagtaan si tafatiran sharciyada ololaha doorashooyinka Jubaland.

Qodobada aan cadsanaayo in aan faah - faahin ka helo waa kuwan;


1. Yaa ka masuul ah oo qaabilan baaritaanada dabagalka ah maamulka Jubaland?
2. Maxeey ka kooban tahay baaritaanada cadaynta danbi la'aanta ?
3. Waa maxay qeybaha kala duwan ee uu ka kooban yahay cadaynta danbi la'aanta maamulka Jubaland? Yaa u xilsaar ran bixinta cadaynta danbi la'aanta maamulka Jubaland?
4. Door intee in le'eg ayuu Guddigu ku leeyahay geeddi-socodka hannaanka bixinta cadaynta danbi la'aanta?
5. Waa maxay waqtiga gudigu u qabteen helitaanka cadaynta danbi la'aanta, ama mudada kama danbaysta ah ee uu murashuxu ku heli karo hadii uu cadsado cadayntas?

Iyadoo la eegaayo hufnaanta, iyo in murashuxu kalsooni buuxda uu ku qabo guddiga, waxaa laga maarmaan ah in su'aal walba iyo cabasho kasta la tix galiyo. Sidaa daraadeed, waxaan Guddiga ka cadsanaayaa in aan ka helo JAWAAB QORAAL ah oo ku saabsan su'alaha kor ku xusan, ka hor inta aan soo gudbin dukumiintiyada kala duwan iyo lacagta diiwaan-galinta ee guddigu cadsadeen.

Waxaan cadaynayaa in aan u hoggaansanahay hanaan doorashooyin xor ah oo caddaalad ah iyo shuruudaha doorashooyinka Jubaland, waxaase lagama maarmaan ah in hanaankaas si siman ugu wada adeegaayo murashixiinta kala duwan ee u taagan xilka madaxatinimada iyo sharciga guud ee u yaal dalkeena.

Waxaan rajaynayaa in aad codsigayga sida ugu dhaqsaha badan aad iiga soo jawaabi doontaan, si aan u seegin waqtiga kama danbaysta ah ee aad u qabateen murashixiinta xilka u taagan.

Mahad Sanidin,

  
Abdirizak Farfaag  
Murashax Madaxweynaha Jubaland

**H.E. Moxamed Cabdullahi Moxamed**, Madaxweynaha Dawlada Federaalka Soomalya  
**H.E. Sheekh Axmed Moxamed Islan**, Madaxwaynaha Jubaland.

**Hon. Moxamed Mursal Sheekh Abdirahman**, Gudoomiyaha Golaha Shacabka- Soomaliya

**Hon. Cabdi Xashi Cabdulahi**, Gudoomiyaha Aqalka Sare - Soomalya

**H.E. Xasan Cali Khayre**, Raiisal wasaaraha Dawlada Federaalka Soomaliya

**Ms. Xalimo Ismaciil Ibrahim**, Madaxa, Guddiga Madax bannaan ee Doorashooyinka Dawlada Federaalka Soomaliya

**Mudanayaasha u Taagan Tartanka Madaxtinimada Jubaland**

**AU, EU, UNSOM, and IGAD.**